In kastoo luuqad kasta aysan lahayn turjubaanno la citiraafsan yahay, haddana waxaa jira luuqado leh sida afka dhagooleyaasha Mareykanka, afka Carabiga, afka Faransiiska, afka Ruushka iyo afka Isbaanishka.

Haddii aan turjubaan laguu keenin cabasho ayaad u soo gudbin kartaa Maxkamadda Sare ee Ohio [Supreme Court of Ohio]. Fadlan warqaddan dhinaceeda kale ka eego sida cabashada loo soo gudbiyo.

## Haddii aadan turjubaan dooneyn

Labada dhinacba way diidi karaan xaqa ay u leeyihiin turjubaan. Haddii aad turjubaan rabto xaqa aad u leedahay waxaa laguugu sharxi doonaa afkaaga hooyo (arrintaasi waxay u baahan kartaa in turjubaan la adeegsado), maxkamadda ayaa fursad kuu siin doonta inaad qareen la hadashid intaadan diidin xuquuqda aad turjubaan u leedahay. Maxkamadda ayaa hubsan doonta inaad si wanaagsan u taqaanno afka Ingiriiska inta aan turjubaan la adeegsan. Xuquuqda aad turjubaan ku diideyso waa in lagaa arko, oo aad aqoonteeda leedahay iyo ikhtiyaarkaa.

**Maxkamaddu ma aqbaleyso xuquuqdaada haddii ay go'aamiso inaad u baahan tahay turjubaan si loo dhowro xuquuqdaada iyo in hawsha maxkamadda si buuxda loo qabto.**

## Cabasho miyaad sameyneysaa?

Maxkamadda Sare ee Ohio [Supreme Court of Ohio] ayaa sameysay nidaam cabasho si loo xaqiijiyo in ay dadka dacwada wata ee aan ku hadlin af Ingiriis fiican ka qeyb galaan maxkamadaha. Hoos waxaa ku qoran faahfaahinta tallaabooyinka uu qof sameyn karo si uu uga soo warbixiyo maxkamad deegaanka ku taalla oo u keeni weyday turjubaan uu u baahnaa, iyadoo ay tahay in laguu keeno siduu dhigayo sharciga Maamulka 88 [Rule of Superintendence 88].

### Soo-diridda Cabashada

Adiga, qareenkaaga, ama qof kuu hadlaya ayaa soo gudbin kara cabasho ku qoran af Ingiriis ama afkaaga hooyo iyadoo la raacayo siyaaabaha soo socda:

- Soo garaac 1.888.317.3177 oo lacag la'aan kuu ah. Turjubaanno ayaa laguu diyaariyey in ay luuqadda kugu caawiyaan.
- Waraaq u soo dir Barnaamijka Adeegga Turjubaanka [Language Services Program], 65 South Front Street, Columbus, Ohio 43215-3431.
- Inaad farriin internetka ah cabashada ugu soo dirto Barnaamijka Adeegga Turjubaanka lsp.resolution@sc.ohio.gov.
- Inaad soo buuxiso foomka cabashada oo aad ka heleyso www.sc.ohio.gov/JCS/interpreterSvcs.

Wixii faahfaahin dheeraad ah ee ku saabsan nidaamka cabashada ka eego www.supremecourt.ohio.gov.

THE SUPREME COURT *of* OHIO

# Sida aad Turjubaanka Ula Shaqeyneyso






Macluumaadka

**Dacwoodeyaasha Dhega-la' & Kuwaan Af Ingiriis Fiican Ku Hadli Karin**

(Somali/Soomaali)

## Waajibaadka Turjubaanka Maxkamadda

Waajibaadka turjubaanka maxkamadda waa inuu caawiyo dadka aan ku hadlin af Ingiriis fiican ama aan afka Ingiriis kula hadli karin dadka maxkamadda

Turjubaanku wuxuu hawshiisa ku sameeyaa inuu dadka cod u noqdo. Si kale haddii loo dhigo shaqada turjubaanka waa inuu yiraahdo wixii ay ku hadlaan garsooraha, xeer-ilaaliyaha, qareenka ama qofkii kale ee hadla isagoo kor u dhahaya intuu kiisku socdo, laakiin afka aad ku hadasho ayuu kuugu sheegayaa. Waxa kale oo uu turjubaanku dhahayaa wixii aad ku tiraahdo afkaaga hooyo, laakiin waa inuu ku sheegaa af Ingiriis si ay dadka maxkamadda u fahmaan wixii aad tiri.

Waajibaadka turjubaanka waa inuu macluumaadka kuu maqashiiyo sida ay u maqlaan dadka afka Ingiriiska ku hadla markay maxkamad joogaan. Haddii qofka hadlaya uu isticmaalo kelmado adag, turjubaankuna kelmado adag ayuu afkaaga hooyo ku isticmaali doonaa. Haddii qofka hadlaya uu isticmaalo kelmado fudud, turjubaankuna kelmado fudud ayuu afkaaga hooyo ku isticmaali doonaa. Haddii ay jiraan wax aadan fahmin, adiga ayey ku jirtaa inaad weydiiso wixii aadan fahmin.

Sharcigu siduu qabo turjubaanku waa inuu turjumo wax kasta oo la sheego ama qoran, iyadoon waxba lagu darin ama laga dhimin, aan koobeyn, ama aan la beddelin macnihii hadalka asalkii siduu ahaa. Turjubaanku uma joogo inuu bixiyo fikrad, talo, ama caawimaad aad ku go'aamiso kiiskaaga. Fadlan ogsoonow turjubaanka maxkamadda:

- **Ma aha** bulsho-u-adeege
- **Ma aha** qareen
- **Ma aha** dad-hage
- **Ma aha** la-taliye
- **Ma aha** khabiir sharci
- **Ma aha** qof kuu hadli kara

Turjubaanka waxaa loo tababaray oo keliya inuu wax turjumo oo waxaa lagu citiraafsan yahay turjumaadda sharciga oo keliya. Haddii uu turjubaan talo ku siiyo ama uu kuu sheego fikrad uu kiiskaaga ka qabo, fadlan u sheeg garsooraha ama cabasho u soo dirso Maxkamadda Sare ee Ohio [Supreme Court of Ohio]. Macluumaadka aad cabasho ku sameysan karto wuxuu kuugu qoran dhinaca kale ee waraaqdan.

## Talooyinka Adeegsiga Turjubaanka

Adeegsiga tujubaanka maxkamadda jahawareer ayuu noqon kartaa sababtoo ah waa inaad qof kale u sii marto macluumaadka iyo la-hadalidda garsooraha. Talooyinka soo socda raac markaad adeegsaneyso turjubaanka maxkamadda:

- Si taxaddar badan u dhageyso turjubaanka.
- Sug turjubaanku inuu hadalka dhammeysto intaadan jawaabin.
- Si caadi ah kor ugu hadal si turjubaanku u maqlo wax kasta oo aad tiraahdo.
- Haddii aad wax su'aalo ah qabto ha weydiin turjubaanka. Balse waxaad toos u weydiisaa qareenkaaga ama gasooraha.
- Ha hadlin xataa haddii qof maxkamadda jooga uu adiga kaa sheego wax aadan oggoleyn. Waxaad lagu siin doonaa fursad aad ku hadasho.

## Anshaxa iyo Masuuliyadda Xirfadle ee Turjubaanka

Marka turjubaannadu ay u shaqeynayaan maxkamadda waa dad dhexdhexaad ah. Shaqadoodu waa in si sax ah la isu fahmo. Turjubaannada maxkamadda waxaa xaddida shaciga anshaxa oo xaddida waxa ay sameyn karaan. Turjubaanku marka laguu keeno waxa uu ka turjumi karaa hadalka labada dhinac oo keliya. Waa adiga iyo qareenkaaga in aad go'aan ka gaartaan kiiskaaga. Waxyaabaha ay tahay in ay qabtaan turjubaannada maxkamadda waa:

- In ay turjumaan wax kasta oo labada dhinac ay maxkamadda ka dhex sheegaan.
- Inuu sameeyo macnaha hadalka oo sax ah oo buuxa ee qofkii hadla.
- Inuu diido dhinac-la-jirid ama inay soo jiitaan mid ka mid ah labada dhinac.
- Inuu runta ka sheego aqoontiisa oo sax ah si buuxda.
- In uusan dadka uu u turjumayo siin karin talo xagga sharciga ah ama fikrado.
- Inuu diido ka-hadlid shakhsi ahaaneed, gaar ahaan kiiskaaga.
- Inuu afkiisa dhowro oo xiradle ahaado.

Turjubaanku wada-hadal gaar ahaaneed adiga kulama yeelan karo, lamana yeelan karo dhinaca kale, ama markhaati uu u turjumayo. Marka keliya ee uu turjubaanku wax wada-hadal ah la yeelan karo adiga ama dhinaca kale waa marka maxkamaddu idan u siiso si loo xaqiijiyo in adiga iyo turjubaanku aad is fahmi kartaan oo aad isku af ku hadashaan.

Ugu dambeyn, turjubaanka waxaa khasab ku ah inuu xafido macluumaadkaaga. Turjubaanka looma oggola inuu ka hadlo kiiskaaga, gaar ahaan wada-hadal kasta oo idin dhex mara adiga iyo qareenkaaga. Turjubaanku kiiskaaga kalama hadli karo dadweynaha, idaacadaha, ama qof kale oo ka mid ah bulshadiinna.

## Turjubaan in la Keeno

Marka la eego sharciga Gobolka Ohio, maxkamadda ayey waajib ku tahay in ay turjubaan u keento garta la go'aaminayo, sida uu dhigayo sharciga Ohio Revised Code 2311.14. Weliba tani waaba xukun maxkamadeed oo laga heli karo Sharciga 88 ee Sharciyada Maamulka Maxkamadaha Ohio, kaasoo khasab ka dhigayaa maxkamaddu in ay keento turjubaan la citiraafsan yahay haddii la heli karo. Sharciga 88 [Rule 88] wuxuu khasab ka dhigayaa maxkamaddu inay diiddo in ay isu turjumaan saaxiibbo, xubno qoys ka wada tirsan ama dad marag-furid ku sameyn kara adiga iyo dhinacyada kale, waxa ay sameyn karaan waa eex ama qof-jecleysi.